

Waxa la qaadanayo inta lagu jiro daadgureynta

Marka lagu daro waxyaabaha kale ee xirmada diyaargarowga, dadka qaba baahiyaha caafimaad ee gaarka ah, dhibaatooyinka dhanka socodka ah ama naafanimo ee u baahan in la daadgureeyo waa in ay soo qaadaan:

- Waxyaabaha wajiga lagu daboolo
- Waxyaalaha aalkolada ka kooban ee gacmaha lagu nadiifiyo
- Daawooyinka oo dhan (oo ku jira baakadihii dhalada ee rasmiga ahaa haddii ay suurtagal tahay) ama nuqulo qoran oo ah dhammaan daawooyinka la isku qoray
- Liiska dhammaan xaaladaha caafimaad
- Ugu yaraan hal dhar oo beddel ah, oo ay ku jiraan kabo adag.
- Wixii qalab caafimaad ee muhiim ah (qalabka socodka 'walkers', kursiga naafada, ulaha, qalabka hawada 'oxygen' iwm.)
- Wixii agabyo caafimaad ee kale oo muhiim ah (waxyaalaha la isku duro 'syringes', qalabka dhiiga lagula socdo, tuubada kaadida 'catheters' iyo qalabka looga hortaggo kaadida/saxarada aan la xajisan karin 'incontinence')
- Muraayadaha indhaha, ilkaha macmalka ah, qalabka maqalka kordhiya, aaladaha dhanka isgaarsiin/lagu wada xiriiro
- Telefoonka gacanta iyo jaarjarka 'charger'
- Lambarrada la iskala soo xiriirayo oo loogu talagalay qoyska, daryeel bixiyaha caafimaad iyo farmashiyaha
- Sawir Aqoonsi ah, haddii ay suurtagal tahay
- Macluumaadka caymiska caafimaadka
- Sahayda loogu talagalay wixii baahiyo cunto ee gaar ah
- Waxyaabaha loogu talagalay xayawaanka la korsado, sida cuntada, biyaha, iyo gogosha, hoyga bisada/eyga, hoggaan lagu xiro ee loogu talagalay adeegyada xayawaanka la korsado.

